



U.S. Department of Justice Community Relations Service
(Adeegga Xariirka Bulshada ee Waaxda Cadaalada Maraykanka)

Hoos U dhigista Rabshadaha Bulshada ayadoo la Adeegsanaayo Kulanno Dhex-dhexaadin ah

Kulannada Fududaynta ah ee U.S. Department of Justice Community Relations Service's (CRS) ee ku aadan Rabshadaha Bulshada ayaa ah barnaamij tababar soconaaya hal maalin looguna talagalay wacyi gelinta hogaamiyaasha bulshada si ay u maareeyaan rabshada u dhexaysa saamileeyda. Barnaamijka ayaa siinaaya hogaamiyaasha bulshada agabka muhiimka ah oo loogu baahan yahay in si guul leh loo qabto kulanno lagu xalinaayo loogana jawaabaayo rabshadaha ka jira bulshooyinkooda. Barnaamijka tababarku wuxuu adeegsadaa talaabooyinka xirfad dhisida ah iyo qaabab looga caawinaayo ka qaybgalayaasha barnaamijka inay ku dhaqmaan xirfadaha loogu baahan yahay in si guul leh loo sameeyo wada hadallo looguna dhiiri geliyo isbadel wanaagsan oo ay ka sameeyaan bulshadooda.

▼ Waa maxay sababta bulshooyinku u tixgelinayaan adeegsiga Barnaamijka Fududaynta Kulannada ku aadan Rabshada bulshada?

Barnaamijkaan tababarka waxaa loo sameeyay inuu u diyaarsho hogaamiyaasha bulshada inay qabtaan kulanno xalinaaya kana jawaabaayo rabshada ka dhex jirta bulshooyinkooda.

▼ Yoolalka Barnaamijka

Tababarida hogaamiyaasha bulshada si ay ugu diyaar garoobaan, u qabtaan, ayna dabagal u sameeyaan kadib kulannada la xariira rabshada iyo dagaalka ka dhex jira bulshada.

Ila la baro hogaamiyaasha si ay u fahmaan aasaasiyaadka xalinta khilaafka.

In lagu dhaqmo xirfadaha loogu baahan yahay in si guul leh loo fuliyo kulannada taasoo ka caawinaysa dhinacyada inay xal ka gaaraan dagaalka.

Guudmarka Barnaamijka ▼



Barnaamijka **Fududaynta Kulannada ku aadan Rabshada Bulshada** wuxuu barayaa hogaamiyaasha bulshada aasaasiyaadka fududaynta kulannada marka rabshada bulshada ka dhex-jirta u baahan tahay wada hadal adag. Tababarka waxaa loo sameeyay in:

- ▶ **Kor loogu qaado** waxtarka hogaamiyaasha bulshada oo ah fududeeyaasha kulanka.
- ▶ **Lagu balaariyo** xirfadaha dhagaysiga iyo kormeerka ee hogaamiyaasha bulshada si looga caawiyo inay fahmaan fikradaha kaladuwan ee xubnaha bulshada.
- ▶ **In la siiyo** hogaamiyaasha bulshada farsamooyin, tilmaamo muhiim ah, iyo khayraad si ay ugu diyaar garoobaan, u fuliyaan, ayna dabagal ugu sameeyaan kadib kulannada loogu talagalay xalinta rabshada bulshada.

Xog ku saabsan CRS ▼

Wuxuu adeegu ku dhisan yahay Title X ee Sharciga Xaquuqda Aadanaha oo soo baxay 1964 iyo Sharciga Kahortaga Danbiyada Nacaybka Ku salaysan ee Matthew Shepard iyo James Byrd, Jr., oo soo baxay 2009, CRS ayaa ah adeegga "nabad ilaalinta Ameerika" ee bulshooyinka waajahaaya qalalaasaha ama isku dhacyada ku salaysan kala duwanaanshaha isirka, midabka, asalka, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, dookha galmada, diinta, iyo naafada. Adeegyada CRS ayaa diirada saaraaya kor u qaadista awooda bulshooyinka deegaanku u leeyihiin inay si madax banaan oo wada jir ah uga hortagaan xalna uga gaaraan dagaallada mustaqbalka ayagoo adeegsanaaya xalinta dhibaataada, aqoon dheeraad ah, iyo wada hadal wanaagsan.

Adeegyada iyo Barnaamijyada CRS ▼

CRS wuxuu barnaamijyo taxaneayaal ah siiyaa bulshooyinka waajahaaya rabshadaha kuwaasoo adeegsanaaya fahanka, kor u qaadista wada shaqaynta, iyo kahortaga iskudhacyada mustaqbalka imaan kara. Shaqaalaha CRS waa dhex-dhexaadiyaal, fududeeyaal, tababeryaal, iyo la taliyaal xirfad leh kuwaasoo khibrad u leh isku keenista xubnaha bulshada si kor loogu qaado awoodooda xal u helida rabshadaha jira iyo kahortaga rabshadaha dhici kara mustaqbalka.

Meesha aan ka Shaqayno ▼

Xarunta dhexe ee CRS 📍

Washington, DC

Saraakiisha Gobalka ee CRS 📍

New England

Boston, MA

Waqooyi-bari

New York, NY

Atlantiga-Dhexe

Philadelphia, PA

Konfur-bari

Atlanta, GA

Galbeedka-dhexe

Chicago, IL

Konfur-galbeed

Dallas, TX

Dhexda

Kansas City, MO

Buuraleyda

Denver, CO

Galbeedka

Los Angeles, CA

Waqooyi-galbeed

Seattle, WA

Xafiiska CRS ee


Goobaha Shaqada 📍

Miami, FL

Detroit, MI

Houston, TX

San Francisco, CA



Hel adeegeena, nagu xirnoow ▼

www.justice.gov/crs



facebook.com/DOJCRS/



[@DOJ_CRS](https://twitter.com/DOJ_CRS)



askcrs@usdoj.gov



202.305.2935

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijkaan ama adeegyada kale ee CRS, fadlan la xariir CRS:

<https://www.justice.gov/crs/contact-crs>